Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I Muqdisho 10kii Junyo 1973 **L. 10**

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Sannaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

SHARCI L. 3, 10 Jiuny 1973 — *Toosin sharci lr. 1 taarikh 29 Marso 1973* — Bog. 155

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Marso 1973 — *Abaalmarin Sharaf, Gobolka Benadir. L. 50.* » 156

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Marso 1973 — *Abaalmarin Sharaf, Gobollada Jubbada Sare. L. 51.* » 157

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 7 Majo 1973 — *Dallacaad la Siiyey Xusen Moxamud Moxamed. L. 52.* » 158

Madbacada Dawladda - Muqdisho

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 11 Majio 1973 — *Magacaabid Dr. Yaslem Cabdulla Sacid. L. 53.* Bog. 159

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 28 Mjio 1973 — *Ogeysiis Badalaad Nadò Dhul Jaalle Xasan Cali Axmed. L. 75.* » 161

WASAARADDA HAWLAHA GUU, 30 Mjio 1973 — *Ogeysiis Badalaad Nado Kadijia Moxamed Shek Abukar. L. 76.* » 162

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Majio 1973 — *Ogeysiis Naada Dhul Moxamed Abdulle Arale. L. 77.* » 162

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Majio 1973 — *Ogeysiis Naada Dhul Iman Warsame Nur iyo Koox la Wadagta. L. 78.* » 163

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 31 Majio 1973 — *Ogeysiis Naada Dhul Moxamud Moxamed Nur. L. 79.* » 164

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR, 7 Majio 1973 — *Dhumida Buuga L. 1104 Xasan iaCf Cabdi. L. 80.* » 165

SHIRKADDA GOGIU - S.p.A. - KISMAYO, 6 June 1973 *Fadhi Guud oo Caadi. L. 18.* » 166

SOMALI AIRLINES S.p.A. L. 82. » 167

SAXID — *Jaalle Cabdelraxmaan Cilmi Caamir.* » 167

BOGGA KOOBAAD

SHARCIYO

SHARCI L. 3, 10 Juniy 1973.

Toosin sharci lr. 1 taarikh 29 Marso 1973

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGA OO TIX GELINAYA Go'o aankii Golaba Sare ee Kacaanka iyo Golaba Xoghayayasha;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodob Kaliya

Qodobka 2aad ee sharciga lambarkisu yahay 1 taarikhdisuna tahay 29 Marso 1973 wuxuu dhaqan la gelayaa Sharciga lambarkisu yahay 9 taarkhdisuna tahay 9kii febrayo 1970.

Muqdisho, 10 Juniyo 1973.

GUDDONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

10 Marso 1973, L. 50.

Abaalmarin Sharaf.

MADAXWEYNA GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Hore ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharga T. tahay 1 oo soo baxay 29kii Oktobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 65 oo soo baxay 18kii Oktobar 1970kii;

WUXUU U BOGEY Sida wacanoo Gobolka Benadir uu u taageeray dhismihii Aqalka Jubba iyo hirgelinta hantiwadaagga aqoonta ku dhisan, isagoo si weyn oo muuqata uga qayb qaadanaya taabba gelinta Kacaanka, tusaale fiicanna u noqonaya Gobollada kale;

MARKUU TIXGELIYEY Taladii Guddiga Abaalmarinta Sharaf:

WUXUU GOOYEY

Qodob gaar ah

In Gobolka Benadir abaalmarin Sharaf loo siiyo Billad Lacag ah oo Tawrinimo ah.

Muqdisho, 10 Marso 1973.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Guddoonshaha Guddiga Abaalmarinta Sharaf
Gaash. Dh. Maxamud Gelle Y.

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

10 Marso 1973, L. 51.

Abaalmarin Sharaf.

MADAXWEYNA GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Warqadda Hore ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharga T. tahay 1 oo soo baxay 29kii Oktobar 1969kii;

MARKUU ARKAY Sharciga T. tahay 65 oo soo baxay 18kii Oktobar 1970kii;

WUXUU U BOGEY Sida wacanoo Gobollada Jubbada Sare, Jubbada Hoose iyo Hargeysa ay u taageereen dhismihii Aqalka Jubba iyo hirgelinta hantiwadaagga aqoonta ku dhisan;

MARKUU TIXGELIYEY Taladii Guddiga Abaalmarinta Sharaf:

WUXUU GOOYEY

Qodob gaar ah

In Gobollada Jubbada Sare, Jubbada Hoose iyo Hargeysa abaalmarin Sharaf loo siiyo 3 (saddex) Billadood oo Maar ah.

Muqdisho, 10 Marso 1973.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyad Barre

Guddoonshaha Guddiga Abaalmarinta Sharaf
Gaash. Dh. Maxamud Gelle Y.

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

7 Majio 1973, L. 52.

Dallacaad la siiyey Jaalle Xusen Maxamud Maxamed.

GUDDOONSHAH GOLAHA SRE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka;

ISAGA OO ARKAY Sharciga ku saabsan Dhismaha Dawladda tiradiisuna tahay 14 ee soo baxay 3dii June 1962 iyo beddellaadii lagu sameeyay;

ISAGA OO ARKAY Xeerkii Wawladda tiradiisuna ahayd 164-120-5736 ee 10kii Sebtember 1968;

WUXUU XEERAYAA

Qoddobka 1aad

Jaalle Xusen Maxamud Maxamed oo ahaan jiray Agaasimaha Waaxda Ammaanka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, derejadiisuna ahayd A3 waxaa loo dallacsiiyey derejada A2.

Qoddobka 2aad

Xeerkani wuxuu hirgelayaa 1dii Abril 1973.

Muqdisho, 7 Majio 1973.

Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle Maxamed Yusuf Weirax
XOGHAYAHA WASAARADDA LACAGTA

VISTO e registrato - Reg. n. 2 foglio n. 127.
Mogadiscio, 31 Maggio 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAMA NUR

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

11 Majio 1973, L. 53.

Magacaabid Dr. Yaslam Cabdalla Sacid Ku-Xiggeenka Qaryaqaanka Guud ee Dawladd.

GUDDOONSHAH GOLAHA SRE EE KACAANKA

ISAGA OO ARKAY Xaanshida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka;

ISAGA OO ARKAY Sharciga tiradiisu tahay 3 iyo ka tiradiisu tahay 29 ee soo baxay 12 June 1962 iyo 1da April 1970 iyo beddellaadda lagu sameeyay;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Dawladda tiradiisuna tahay 166 ee soo baxay 17 September 1972 kuna saabsan isku dubaridka iyo dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Dawladda tiradiisuna tahay 210 ee soo baxay, 5 Agust 1971 ee Guddonshaha Golaha Sare ee Kacaanka uu ku magacaabay Garsoore Goboleed Yaslem Cabdalla Ku-Xiggeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda ee ku meel gaarka ah;

ISAGA OO AQOONSADAL In lagama maarmaan ay tahay in loo magacaabo Dr. Yaslem Cabdalla Sacid jagada uu hayo ahna Ku-Xiggeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda, taas oo uu muujiyey in karti iyo aqoon uu u leeyahay;

ISAGA OO ARKAY Sharciyada tiradoodu tahay 14 iyo 70 ee soo baxay 9 January 1971 iyo 1dii November 1972 kuna saabsana magacaabid iyo sharci simaaya Shaqaalaha Dawladda iyo Garsoorayaasha;

ISAGA OO TIXGELINTA Taladii Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta iyo ta Garyaqaanka Guud ee Dawladda;

Qoddobka 1aad

Marka laga billaabo bisha April 1deeda 1973 Dr. Yaslem Cabdalla waxaa lagu magacaabay Ku-Xiggeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo u qaybsan arrimaha Sharciga madaniga ah, ka shareecadda iyo idariga; isaga oo buuxinaaya darajada lambarkeedu yahay 1 6202 A3

Qoddobka 2aad

Jaalle Dr. Yaslem Cabdalla Sacid marka laga billaabo bisha April 1deeda 1973 wuxuu u yeelan doono mushaaharka iyo gunnadda ay leedahay derejada agaasimaha sida sharcigu dhigaayo. Lacagtiisana waxaa laga bixindoona miisaaniyadda u taal Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 11 Majio 1973.

Jaalle Sareeye Gaas Maxamed Siyad Barre

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

Jaalle Cabdulsalam Shikh Xusen
Xoghayaha Wasaaraddda Garseerka iyo Diinta

Xoghayaha Wasaaradda Lacagta
Jaalle Maxamed Yusuf Weirax

VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 98.
Mogadiscio, li 24 Maggio 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

BOGGA SADDEXAAD

TALLOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

Badalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Xasan Cali Axmed, ku yaal Muqdisho xafadda Wardhikley — T. G. 117-72

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku fadhiya 1800 mdh., ee lagu soo diray warqada teradeed ahayd MW-3-23-444 13-6-1972, waxaa la caddeynalaa in dhulka isaga ah waxuu dhan yahay 35x34 la mid ah 1190 ee aan ahayn sadii hore ee kor ku dhegan, shodimahisuna waa sadii hore loo soo sheegay.

Muqdisho, 28 Majio 1973.

Maamulka Waxda Dhismaha iyo Dhulka

(75) *Moxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Kadija Moxamed Shek Abukar, kuna yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye — T. G. N. 120-64

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Wadada Afgoye, kuna fadhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqadii tiradeedu ahayd MW-120-1493-68, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 30x20, oo ku fadhiyaa 600, mdh. soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi dhul L. 483; Koofur Jid; Galbeed dhul L. 494; Bari dhu L. 496.

Muqdisho, 30 Majio 1973.

Maamulka Waxda Dhismaha iyo Dhulka

(76) *Moxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Abdulle Arale, u usoo qortay arij qaybta Dhimaha iyo Dhulka 25-11-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 12,2x11,5 (140,30) mdh.

Soohdin: Waqooyi Xusen Farah Jama; Koofur Jid; Galbeed Xajia Mumin; Bari Kalif Salim.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Majio 1973.

Maamulka Wáxda Dhismaha iyo Dhulka

(77) *Maxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Iman Warsame Nur iyo Koox la Wadagta, u soo qortay arji qalbta Dhismaha iyo Dhulka 10-7-1969, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 60x50 (3.000) mdh.

Soohdin: Waqooyi Dhul Dawladdeed; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Majio 1973.

Maamulka Waxda Dhismaha iyo Dhulka

(78) *Maxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamuud Moxamed Nur, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 7-12-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21ka Oktobar, oo leh qiyaas rektangular, kuna fadhiya 30x20 (600) mdh.

Soohdin: Waqooyi Jidka 21 Oktobar; Koofur Gabal dhul ah L. 575; Galbeed Jid; Bari Gabal dhul ah L. 752.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Majio 1973.

Maamulka Waxda Dhismaha iyo Dhulka

(79) *Maxamed Cabdi Sacid*

MAXMADDA GOBOLKA XAMAR

Waxaan arkay daowadha;

Markaan arkay waxay ku saabsantahay ogeysiiskii Bankiga Kaydiska iyo Donta waxaan ogaday in ay ku tiirsantaha shaqada xaafiiskan;

Oo aan arkay qodobka 69 D. L. 9-9-65 N. 2;

Waxaan cadaynayaa Dhumida Buuga lam. Yahay 1104,00 ay ku taalo Sh. So.921,30 (sagaalboiyolabatan) 3 kumi.

Waxaan amrayaa in loo sameeyo Buugas Xasan Cafi Cabdi, Mudo 30 maalmood ah oo ay ka bilabato malinata lagu shaaciyo Bollettino Ufficiale, hadan la helin qofkale oo Buuga Sheegtah.

Waxaa kaloo la codsanayaa in Buu-gaganta laga saaro ninka aan kor ku soo sheegnay ama qof ka sita wakaald aan shaki ku jirin, iyadoo la sugaayo 30 kaas bari beri oo kor ku qoro.

Muqdisho, 2 June 1973.

GARSOORE

(80) *Jaalle Dr. Xusen Shekh Cabdiraxman*

SHIRKADDA GOGIU S.p.A. — KISMAYO

WICID FADHI GUUD OO CAADI AH

Ragga ka mid ah Shirkadda «GOGIU» S.p.A. ee saldhigeedu yahay Kismayo, waxaa laga codsanayaa in ay ka soo qeybgalaan Fadhiga Guud ee Caadiga ah oo ka dhicidoona xarunta Shirkadda ee Kismayo, taariikhdu markay tahay 30ka Juunyo 1973, saacadduna tahay 19,30 oo fiidnimo, haddii fadhi labaad loo baahdana, wuxuu dhicidoona taarikhdu markay thay 29 Luulio 1973 — isla xaruntii isla saacadiioo si la isula ogolaado:

ARRINTA MAALINTAAS

1. Xog-warramidda Golaha Maamulka iyo Guddiga Kormeeridda ee howlihii la qabtay oo xirmay sannadka 1972;
2. Kawada doodid miisaaniyadda sannadkii 1972: fa'idadii iyo khasaarihii la xiriiray iyo sidii meel la isula dhigilahaa;
3. Arrimo iyo waxyaalo kale.

Xaq ayey u leeyihiin in ay ka soo qeybgalaan fadhiga sida kor loogu yeerayba — nimanka ku qoran Buuga Shirkadda ugu yaraan shan bari ka hor maalinta fadhigu dhacayo.

Muqdisho, 6 Juunyo 1973.

GOLAHA MAAMULKA

(81)

SOMALI AIRLINES - S.p.A.

Oo saldhiggeedu yahay Muqdisho, Jamhuriyadda Dimoqradiga ee Somaliya

Ra's maalkeeduna yahay Sh. So. 1.600.000

OGEYSIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikadda SOMALI AIRLINES S.p.A. waxa la weydiisanayaa inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono Saldhigga Sharikadda ee ku yaala magaaladda Muqdisho, maalinta 27ka Junyo 1973, saacaddu markay tahay 17ka galabnimo. Haddii shirkaaso suura geli waayo maalinta 27ka waxa mar labaad laysu iman doona 3da Lylyio saacaddu markay tahay 17ka galabnimo.

Waxyaabaha shirka lagaga wada hadli doona waxaa weeye:

1. Xogwarrankii Guddiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha Sarikadda. Hor dhig xaanshida miisaaniyadda ganacsiga iyo Dheef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1972.
2. Magacaabid Guddiga Maamulka Guud ee Sharikadda.
3. Magacaabid Guddiga Baarayaasha Sharikadda iyo Guddomiyahooda oo ku xiriirta Sharciga.

GUDDIGA MAAMULKA GUUD
EE SHARIKADDA SOMALI AIRLINES

(82)

S A X I D

Xeerka Guddonshaha G. S. K. lr. 16 - 29 Marso 1973, lagu dhigay Faafin Rasmiga ah lr. 1 - 1 Abrile 1973, jaallaha lagu magacaabay Agaasimaha Guud Wakaaladda Betrolka Ummada, magaciisa ee dhan waxa weeye: Jaalle CABDELRAXMAAN CILMI CAAMIR.